**Duqa Magaalada Michelle Wu**
**Khudbada Xaalada Magaalada • 25ka Janaayo, 2023**

*Side loo diyaariyay jeedinta khudbada*

Habeen wanaagsan, reer Boston! Caawa waxaan wada joognaa Hoolka Muusiga ee cusub ee quruxda badan ee MGM, waxaana rabaa inaan u mahadceliyo Shirkadda Muusikada ee Red Sox iyo Fenway sida aad magaaladeena u martigeliseen iyo ballanqaadkiina.

Waan ka mahadcelinayaa in ay igu soo biiraan la-hawlgalayaasha adeegga dadweynaha: Guddoomiyaha Golaha Flynn iyo Xildhibaanada Magaalada Boston, Guddoomiye Robinson iyo Guddiga Iskuulka Boston, Duqa Janey, Ambaassadoor Flynn iyo Marwo Flynn, Guddoomiyaha Healey, Guddoomiyaha Senate-ka Spilka, Xeer Ilaaliyaha Guud Campbell, Khasnaji Goldberg, Wakiilada Gobolka iyo Senatarrada, Xeer Ilaaliyaha Mareykanka Rollins, madaxda deegaanka. Aad baad ugu mahadsan tihiin inaad nagala soo qaybgashaan.

Iyo turjumaannadeena, waad ku mahadsan tihiin inaad naga caawinnaysaan caawa si aan u gaarno dadkeena magaaladda nala deggan, oo toddoba luqadood ku turjumaya.

***

Sannad ka hor toddobaadkan, waxa la ii xilsaaray mas'uuliyad maayarnimo, aniga oo safka hore kaga jira Superintendent of Streets, Mike Brohel, isagoo markaa ku kaxeeynayey waddooyinka mugdiga ah ee barafaysan waaberiga ka hor, oo uu kooxdiisii kala shaqaynayey cusbo ku shubid, xoqid, iyo ka guulaysiga laamiga barafka saran. Markii aan tagnay Hall-ka Dawladda Hoose, Al Vilar waxa uu mar hore ammaan ku ahaa Xarunta Maareynta Taraafikada, qado ka buuxsan duufaan dheer, iyada oo la la soconayo siddeed shaashadood oo waaweyn oo loogu talagalay in lagala socdo qof kasta oo u baahan caawimaad ee dhanka waddooyinka. Sida magaaladeena inteeda kale ay jiifeen, dadka wacaya 311 iyo 911 ee Boston waxay ka jawaabeen taleefoonada inta lagu

jiray habeenkii oo dhan, si ay u soo diraan adeegyada halka loogu baahnaa, halka shaqaalaha maamulka degdega ah, EMS, booliska, iyo dab demiska ayaa diyaar u ahaa.

Magaaladeena waxaa daadihinayay dad aad u badan, dadka qaar oo wejigooda aan abid arag... Kuwaas oo aan lagu soo qaadin wurarka, ama aan loogu yeerin masraxa iyagoo abaal-marin aqbalaya, laakiin iyaga oo ka dib maalin buuxda oo dhan xubnaheena u adeeggaya, oo weli wakhti u hela inaay tababbar siyaan horyaal yar oo ku tababbarta McConnell Park ama si tabarruc chaan wakhtigooda u geliya East Boston soup kitchen.

Taas ayaa ah sababta, intii aad soo socoteen caawa, aad u aragtay sawirada cajiibka ah ee *in yar* oo ka mid ah geesiyaasha rayidka ah ee maalin kasta u adeegga dadka magaaladeena degga. Dhammaan Shaqaalaha Magaaladeena: Guul kasta iyo horumar kasta ee adeeg la fuliyay, ee xagga adeegyada magaalada aan u fidinno, iyo faahfaahin kasta oo ku saabsan ajendaha aan caawa halkan idinkula wadaagayno — adiga ayaa suurtogaliyay. Aad baan ugu faanayaa inaan isla garab shaqeyno.

***

Waxaa laga joogaa saddex sano tan iyo markii aan awoodnay inaan waji-ka-waji isu nimaadno si aan u dabbaaldegno—aan dib u jaleecno - Xaaladda Magaaladeenna. Oo waxaan dhammaanteen dareennay dhibka wadareedka ee na soo wada gaaray sannadahan iyo saamaynta joogtada ah ee soo gaaray quluubtayada iyo maankeena, ganacsiyada maxalliga ah iyo miisaaniyadda qoyska.

Boston markastaaba waxay ahayd magaalo adkaysi leh.

Laakiin marka adkeysigu ka yimaado xoog aan ugu yeerno, xaalad joogto ah, waa waqtigii aan joojin lahayn ku adkeynta dunnida nafteena, oo ay tahay waqtigii aan bilaabi la'hayn beddelka adduunka ee aan ku nool nahay.

***

Maxaa yeelay isbeddel dhabta ah wuxuuk a yimaadaa bulshada dhexdeeda, sidaas darteedwaan oggaa shaqadaydii ugu horeysay iyo tan ugu muhiimsan ee maayarka

magaalada ahaan inay ahayd inaan dhiso kooxda Boston ee u qalanto. Kooxdaas caawa  halkan ayay ku sugan yihiin.

Golaheena Wasiirradu marka seddex loo qaybiyo lababa waa dadka middabada leh! Waxaan nahay DPS, waalidiin, qallin-jebiyayaal. Waxaan ku hadalnaa luqaddaha Isbaanish iyo Carabi, Fiyatnaamiis, Heetiyan Kreole, iyo luqaddo intaa ka badan. Waxaan si daacadnimo ku jirto uga hadalnaa Bostontii hore, tan hadda, iyo tan mustaqbalka, sababtoo ah waxaan ku noolayn caqabadaha oo aan wadaagnay riyooyinka qoysaska aan hadda u adeegno.

Ninkii dhalinyarada ahaa ee xarumaheena bulshada ugu shaqayn jiray sida naf-badbaadiyaha dabaasha ayaa hadda ah kormeeraha Madaxeena Adeegga Aadanaha (Chief of Human Services): José Massó.

Gabadha ay dhashay haweennaydii iskuulka qadada ciyaalka siin jirtay, ayaa hadda ah macalimad, oo dugsi sare qaran ahaan laga aqoonsan yahay Dorchester ka furtay, oo hadda inoo ah Muraaqibkeen Guud ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston Superintendent: Mary Skipper.

Wiilka ka yimid Roxbury ee doonayey inuu u adeeggo oo ilaaliya, kaas—oo dhibaato kasta uu soo marayba, iyo soddon sano in ka badanba—kaas oo ka soo dhex muuqday heer kasta oo hoggaamineed ee Waaxda Booliska Boston, ayaa hadda inoo ah Taliyaheena Booliska Boston (Boston Police Commissioner): Michael Cox.

Gabadhii soo aragtay waalidiinteeda oo qaxooti ahaa oo maqaayad weelasha ku dhaqa si ay nolol wanaagsan ugu abuurto carruurtooda—ayaa hadda waxay ina hogaamisaa dadaalkeena si aan u hubinno in *dhammaan* shaqaalaheena oo dhan, iyadoon loo eegayn meesha ay ku dhasheen ama luqadda ay ku hadlaan, inay helaan caafimaad, badbaado, iyo sharaf ayaa hadda ah Madaxeena Xooginta Shaqaalaha (Chief of Worker Empowerment): Trinh Nguyen.

Ilmaha sabiga ah saanta ugu horreysay ka dhex qaaday xarunta xannaanada ee Hall Hall, ayaa waynaantiisa noqday qof mas'uuliyiinta degmada la xisaabtama hoggaamiyeyaasha magaalada ee kala duwanaanshaha jinsiyadeed ee qandaraasyada magaalada isaga oo ah Madaxa iyo Maamulaha Golaha Dhaqaalaha Madow ee (Black

Economic Council of MA), oo hadda waa Madaxeena Fursadaha Dhaqaalaha & ka Qaybgeliyaha (Chief of Economic Opportunity & Inclusion): Segun Idowu.

Si bulshooyinkeena oo kale, kooxdan way diidan tahay inay aqbasho in arrimuhu ay sii ahaadaan sidii ay weligood ahaan jireen. Waxaan wax ka qabanaynaa arimaha adag, ee sii adag ee ay dadka magaalada deggan ay wajahaan, iyada oo aan loo eegin sida qotodheer ee ay u qotonsan yihiin ama siyaasad ahaanba sida ay yihiin.

Markii aanu xafiiska la wareegnay iyada oo markaas xilliga jiilaalka nagu soo food la'haa, iyadoo ay boqollaal ku noolaayeen si ammaan-darro, xeryo nadaafad-xumo ka jirtay—anaga dhinac uga ma jeesan: Waxaan dhisnay qaab guryayn cusub iyo adeegyo si teendhooyinku u soo degaan dadkuna ay u bogsadaan. Iyo iyada oo loo marayo barnaamijka Newmarket BID's Back to Work, dadkii markii hore ku noolaa Mass & Cass ayaa hadda qayb ka mid ah kooxda ka shaqaynaysa inay aagga nadiifiyaan oo ammaan u noqoto qof walba. Madaxdaas qaar ka mid ah caawa halkan ayay nala joogaan. Mike, iyo Mike, Tim, Carlos, iyo Melissa: wadajir ahaan waxaa sharaf wayn noo ah inaan si wadajir ah u qabanay shaqadan muhiimka ah.

Markii Omicron uu soo baxayy oo uu isbitaalladeena qarka buuxiyay, dib u ma noqonin: qaadista tallaabo go'aamin caafimaadka dadweynaha, sababtoo ah, dhib kasta oo soo noqnoqda, Boston waligeed kama tanaasuli doonto ilaalinta dadkeenna. Oo waxaan rabaa inaan u mahadceliyo qof kasta oo ka mid ah Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston, Agaasimaha Fulinta Dr. Bisola Ojikutu, iyo dhammaan shaqaalaheena caafimaadka dadweynaha iyo shaqaalaheena daryeelka caafimaadka.

Markii MBTA aan oggaanay inay ugu dambeyntii dib u hagaajin weyn ku sameyn doonto khadka Orange-laakin ogeysiis labo toddobaad ah oo kaliya—ma aanaan ka laabanayn: waax kasta oo Magaaleed ka tirsan ayaa soo galay si ay u sii socoto Boston *oo* caddaysay in nidaam badan oo isku wada xiran, sida suurtogalka isugu xiran. Caawa, waxaan dib u cusbooneysiinayaa baaqeyga ku aaddan dadka reer Boston inay kursi ku yeeshaan Guddiga MBTA.

***

Xaalado aan caadi ahayn, kooxdayadu waxay diideen inay dejiyaan. Sanadkii la soo dhaafay:

Waxaan samaynay saddex leen oo bas ah oo sideedaba bilaash ah. Hadda, waxaanu dardargelinaynaa in ka badan labaatan mayl oo waddooyin bas mara oo cusub, ballaarinta shabakadayada baaskiilka, iyo abaabulka xitaa munaasabado Waddooyinka Furan ee xaafadaha.

Waxaan si barbar ah aan la shaqeynay dadka reer Egleston Square iyo la-hawlgalayaasha ganacsiga si aan u sugno Community Peace Garden ee saaran Waddada Washington Street; oo aan 40 aartiistayaal ku sugan Uphams Corner ka caawinay kuwaas oo wajahayay in laga saaro oo hadda hantiyay dhismahooda—Humphreys Street Studio ayaa hadda baaqday oo sii jiraya. Oo, sanadkan degmada Boston samayn doonta maalgashiga ugu weyn abid ee fanaaniinta iyo farshaxannada.

Waxaan samaynay goobo ama meelo iyo adeegyo si Degmadeena si sahal loogu helo: waxaan furnay dhisme cusub oo si buuxda loo heli karo ee City Hall Plaza iyo xarun duqaw oo ku taal Orient Heights, annaga oo kaashanayna Golaha Magaalada iyo Guddidayada Naafada si TV-yada dadwaynaha looga baahdo inay noqdaan kuwa qoraallada shaashada ku soo qora, kaas oo markaa suurtogalin doonaa in 19,000 duqaw adeeg ugu fidiya; iyo in aabkeena 311 u noqdo mid lagu qoran dhawr luqaddood waa markii ugu horaysay, oo lagu qoro kow iyo toban luqadood.

Xafiiskeena Fasallada Waxbarashada Hore ee Early Childhood wuxuu fasallada Pre-K uga dhigay mid bilaash u ah ardaydeena yaryar wuxuuna bilaabay barnaamij horumarinta xirfadeed si uu u caawiyo barayaasha hore inay wax ku baraan Boston dhexdeeda, si deyn la'aan ah. Waxaan la dagaalanay in la dagaalannay in dowladda gobolka la wareegto Dugsiyada Dadweynaha Boston, waxaan keenay koox cusub oo hogaaminaysa degmada, waxaan hawlgelinayay oo aan soo dhawaynay basaskii ugu horeeyay ee dugsiga ka howlgala oo koronto ku shaqeeya ee Readville.

Saraakiisheena booliiska ayaa soo xareeyay ku dhawaad 900 oo qoryo ah oo laga soo qabtay jidadkeena oo waxay la shaqeeyeen bulshada si ay u gaaraan heerka ugu

hooseeya ee Qaybta Koowaad, rabshadaha iyo dembiyada hantida ayaa hadda ah kii ugu hooseeyay ee 15 sano ah. Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Guddoomiye Michael Cox imaatinka uu yimid guriga ee Boston, Muraaqibka Guud Greg Long oo 18 bilood in ka badan ahaa Ku-simaha Guddoomiyaha, iyo dhammaan saraakiisheena hawsha adag qabanaya.

Rabshadaha ka dhexdhaca jaaliyadda dhexdeeda waxaan raadineynaa inaan ku dhameyno xeelado cusub si aan wax uga qabano dhaawacyada oo aan u bixinno taageerooyinka muhiimka ah—laga bilaabo barnaamijka Howlwadeenka Badbaadada Dhallinyarada (Youth Safety Task Force), barnaamijka ka jawaab celinta dhibaatada kale ee EMS iyo adeegyada caafimaadka dabeecadda. Oo, bishan Abriil dhexdeeda, waxaan bilaabi doonaa Barnaamijka Kadeetka Dab-damiska (Fire Cadet Program) iyada oo aan uga mahadcelineyno hoggaanka Guddoomiyaha cusub ee Dabdemiska, Paul Burke.

Sidoo kale waxaa qalinjebiyay fasalka koowaad ee ardaydeena barnaamijka PowerCorps ee Boston, inaga oo ku tababarnay dhalinyarada xaafadeena shaqooyin fiican ee dhaqaalaha cagaaran. Qaar badan oo iyaga ka mid ah ayaa caawa halkan nala jooga.

Waxaan maalgashi ku samaynay ganacsiyo dhaxalgal ah oo soo jireen ahaa waxaanan ganacsatada cusub aan ka caawinaynaa inay ganacsi ka furtaan dukaamada tafaariiqda ee bannaan si ay dib ugu soo nooleeyaan meelaha ganacsiga ee xaafaddayada. Oo waxaan ku faraxsanahay in shirkadda Lego ay xaruntooda Waqooyiga Ameerika ay deertan ka dhisayso magaalada Boston. Waxaan horumar ka sameynay inaan soo xirno gandaloolada kala duwanaanshaha ee qeybinta, bixinta qandaraasyo qiimihiisu ka badan yahay $100 milyan—laga bilaabo qadada iskuulka laga bixiyo ilaa baraf xaaqida—ilaa ganacsiyada ay leeyihiin haweenka iyo dadka midabka leh. Waxaa ku mahadsan sharciyada uu ansixiyay Golaha Magaalada oo ayna ansixiyeen sharci-dejinta gobolka bishii la soo dhaafay, waxaan awooddi doonnaa inaan intaa in ka badan samayno. Oo waxaa intaa dheer waxaan samaynay anga oo buuxinayna 5,000 oo godod, anaga oo ururinaynay in ka badan 500 oo tan oo ah qashin jidka dhinaciisa yaala, iyo waxaan waxaan xaaqnay ilaa 53 inji oo baraf ah sanadkii hore.

***

Sida magaalooyin kale oo aad u badan, tan ma noqdeen mid suurtawda.

Laakiin Boston waligeedba ma oggolaan in cid kale ay qeexdo fursadaheena.

Mahadaa waxaa iska leh dadka reer Boston in aan caawa halkan istaago oo aan iraahdo—xaaladda Degmada waa mid xoogan.

Oo waxaan haysanaa agabkii, go'aankii, iyo mas'uuliyadda sidii aan u sii xoojin lahayn.

Inta aan indhaha ku hayno sanadka fooda inagu soo haya, maamulkeena waxa uu xooga saarayaa sidii loo dhisi lahaa magaalo cagaaran oo qof walba u koraysa.

Si taa loo suurtogeliyo waxaa loo baahnaan baahnaan doontaa inaan ku xisaabtano—oo dib-u-dhisno-nidaamyada halkan ina keenay. Markii "Maamulka Dib-u-habaynta Boston" ("Boston Redevelopment Authority") la abuuray ku dhawaad 70 sano ka hor, ujeeddadeedu waxay ahayd mid kali ah: si wadada loogu xaaro horumarka cusub, xitaa haddii ay taasi la macno tahay barakicinta tobanaan kun oo dabaqad shaqo ah, soo galooti ah, iyo deganayaal Madow iyo barawun ah.

Laga soo bilaabo sanadkii 2016 waxaa loogu yeeraa Wakaaladda Qorshaynta iyo Horumarinta ee Boston, ama "BPDA," laakiin diirad saarida dhisidda dhismayaasha halkii ayaa bulshadu dib u dhigtay kartida shaqaalaheeda waxayna sii kordhisay farqiga u dhexeeya magaaladeena.

Tobankii sano ee la soo dhaafay, Boston waxay aragtay dhismihii ugu weynaa ee jiilal: wiishash ka muuqday cirka iyo shaqooyinka dhulka laga waday. Laakin kobacaasi mid ay u wada dhammaa danta bulshooyinkayada oo dhan. Qorshayn la'aanta xasiloonida bulshada waxay la macno tahay in xitaa markay dadkeennu kordheen, qaar badan oo bulshadeena ka mid ah ayaa meesha ka baxay. Loo ma qorshayn in la awooddi karo, iyo gaadiidka, waxay ka dhigan tahay in qiimaha guryuhu iyo taraafikada inuu sare u kacay. Qorshayn la'aanta joogtaynta waxay ka dhigan tahay in horumarka cusub uu wax ka beddelayo saraheena dhaadheer, kaabayaasha dadweynuhu waxay sii waday inay duugoobaan: jidadka tareenada dhulka hoostiisa mara iyo dhismayaasha dugsiyada, barkadaha iyo xarumaha bulshada. Hadda, duufaano xoog badan iyo xagaaga kulul

ayaa xaaladdaha kor u qaadaya. Faafida cudurka samafalka ayaa hoos u dhigay dadkii badnaa ee farasmagaalaha magaalada isugu iman jiray ee caadiga ahaa, sicir-bararka ayaana ku qasbay shaqaale badan inay isku dheelitiraan laba ama saddex shaqo oo keliya si ay caano ugu hayaan talaajad ama kiro isaga bixiyaan. Xilligan baahida ay jirto ama loo qabo, waxaan haysanaa fursad oo waxaanna na saaran waajibaad ah inaan bedelno sida aan u qorsheynayno mustaqbalka Boston. ***

Inagoo hadda hoos imaanayna hogaanka Madaxa Qorshaynta, Arthur Jemison, waxaanu dejinaynaa koorso cusub oo kobcin ah, oo dadku ay yihiin jaangooyooyinkeena. Berrito waxaan saxiixi doonaa amar fulin

aniga oo dhidabbada u aasi donoo Golaha La-talinta Qorshaynta si uu si buuxda isugu daro qorshaynta muddada-dheer, oo aanu u bilowno casriyaynta xeerka aagaggeena. Waxaa hogaamin doona Chief Jemison oo ka koobnaan doona madaxyada golaha Wasiirada ee qorsheynta caasimada, gaadiidka, cimilada, guriyeynta, iyo farshaxanka. Sannadkan soo socda, waxaan ka soo wareegi doonnaa dadaallada qorsheynta ee BPDA una wareegi doonnaa Waaxda Qorsheynta iyo Qorsheynta Magaalada cusub—si aan u ballaarino qorsheynta iyo naqshadeynta magaalooyinka sidii dadaal isku dubarid ah oo hagaya kobaceena. Himiladeena ayaa ah in Boston ay si joogto ah u gaarto dadkayaga ugu sarreeya ee 800,000 degane guryaha iyo dugsiyada, jardiinooyinka iyo gaadiidka dadweynaha si ay u taageeraan kobaceena.

Toddobaadka soo socda waxaan xareyn doonnaa codsi-sharci guri si aan si rasmi ah u soo afjarno himiladii cusboonaysiinta magaalooyinka ee tobannaan sano jirsatay ee ciribtirka waxa loogu yeero "xumada iyo burburka magaalooyinka," taa beddelkeedana aan dib u cusboonaysiinno agabkayaga baahida degdegga ah ee Boston maanta ka jirta—adkeysi, awood-u-helid, iyo sinnaan. Si wada jir ah, isbeddelladan ayaa waxay, markii ugu horreysay tan iyo 1960-kii, dib u soo celin doona qorsheynta oo ah hawlsha ama shaqada dhexe ee dawladda Hoose.

Waxaan sidoo kale kooxdayada mas'uul uga dhigay hagaajinta nidaamka ansixinta aan sinnayn oo aan la saadaalin karin ee niyad jabiya xubnaha bulshada iyo horumariyayaasha. Bisha soo socota, waxaanu samayn doonaa kooxo hoggaamin hanti maguurto iyo hogaamiyayaal bulshosi ay ugu taliyaan isbedelada habka dib u

eegista horumarka ee Qodobka 80. Waxaan sahlin doonaa oo aan dardargelin doonaa wakhtiyada si ay mashaariicda wanaagsan si majarafad dhulka si degdeg ah ugu helaan. Sidoo kale waxaan ka wareejin doonnaa u hoggaansanaanta iyo fulinta BPDA una wareejin doonnaa Xafiiska Guriyeynta si bulshadeena ay ugu kalsoonaadaan in aan mar walba si buuxda uga faa'idaysano heshiisyada horumarinta. ***

Dabcan, si joogto ah uma kobaci karno ilaa dadkeena aanay ammaan ku ahayn guryahooda. Dhibaatadeena dhanka guriyeynta waxay barakicisaa carruurta iyo qoysaska, waxayna hoos u dhigtaa diiwaangelinta dugsiyada, waxay dhaawacdaa meheradaha maxaliga ah, waxay kordhisaa hoy la'aanta, waxayna culays sii saartaa caafimaadka bulshada iyo nidaamyada badbaadada.

Sidaas darteed, qorshaheena dhanka guryaynta waa in uu ahaadaa mid dhamaystiran. Waxaan hawlgelin doonaa qalab kasta, tab kasta, iyo ilooyin kasta si loo abuuro guryo badan oo ay dadka deggani awoodaan.

Waxaan mudnaan siin doonaa in dadka degan ay guryahooda ku sii negaadaan, oo aana soo xirno dondoloolada hanti aan jinsiyadaha u wada sinayn inaga oo kor u qaadayna milkiyaynta guriga.

Sannadkii la soo dhaafay, Xafiiskayaga Guriyeynta wuxuu oggolaaday 3,800 oo guri—intii ugu badnayd tan iyo sanadkii 2018, oo ay ku jiraan 1,300 oo qaybo oo la awoodi karo—kii ugu badnaa ilaa jiil. Oo intaa in ka badan ayaan qaban doonaa anaga oo u qoondayn doonaa inta ugu badan dollarkeena soo kabashada ee dawlada dhexe. Isbuucyada soo socda, Golaha Magaalada waxaan u diri doonaa Codsiga Xeerka Guriga ee ku saabsan dejinta kirada si loo joojiyo kirada oo aan ka ilaalino qoysaskeena barakicinta iyo ka saarida.

Oo waxaan hawlgelinaynaa dhulka Magaalada. Waxaan falanqeynay dhul kasta oo ay leedahay Degmada oo waxaan aqoonsaday dhowr meelood oo dowladda degmada ay awoodi karo inay ka sameeyaan guro la awoodi karo. Sidoo kale waxaan haynaa ilaa 150 boosas banaan oo xaafadaheena ku yaala oo diyaar u ah in la deggo. Dhisayaasha maxaliga ah: waxay nagala shaqeeyaan si aan u naqshadeyno guryo tayo-sare leh, oo la awoodi karo oo kor u qaadaya guryaha xaafad ku hareeraysan, waxaanan ku siin doonaa dhulka bilaash ah. Oo waxaan fidin doonaa kordhin kaalmada amaahda

guryaha si ay dadkeena deggani u awoodaan inay iibsadaan guryahan. Waxaan dardargelin doonaa isbeddellada aagagga ee saadaalinta iyo sinnaanta kobacayada. Kooxdeena ayaa idin la soo socodsiin doonta wixii ka soo cusboonaada ee aagaynta barxadaha iyo jidadka magaalada oo dhan, waxayna dhamaystiri doontaa habraacyada qorshaynta xaafadaha si ay u keenaan kumanaan guryo cusub oo ay taageeraan ganacsiyada yaryar, tafaariiqda, iyo shaqooyinka ka dhigaya Boston xarun dhaqameed firfircoon.

***

Xaafadaheenu waa inay noqdaab mid cimiladu u adkaysanayso oo jaaliyadda diirada saarto. Sannadkan waxaan bilaabi doonaa qorshe hawleedka madaniga ah iyo meelaha cagaaran, waxaanan bilaabi doonaa naqshadaynta xarumaha cusub ee bulshada ee Grove Hall iyo North End.

Oo, waxaan dadwaynaha deggan aan ka caawin doonaa inay maalgashadaan dib u habeynta guryaha qadiimka ah, sida sagxadaha seddexleyda ah, si ay lacag ugu dhurtaan biilasha tamarta oo ay uga ilaaliyaan fatahaada iyo kulaylka. Oo waxaan sii widi doonaa socodka dhismayaal dowladeed, sidoo kale.

Gaaritaanka yoolalkeena cimiladu waxay ka bilaabanaysaa joojinta isticmaalkeena shidaalka foosilka, sidaa darteed waxaan saxiixayaa a Amarka fulinta ee uga baahan dhammaan dhismaha cusub ee magaalada laga dhisayo iyo dib u habeynta waaweyn ee gudahayaga dugsiyada, dhismayaasha dawladda hoose, iyo guryaha dadweynaha, si ay u noqdaan kuwo gebi ahaanba laga saari doono shidaalka foosilka.

Oo maxaa yeelay "cagaar" iyo "la awoodi karo" waa waxa wada socda, oo Maamulka Guryaynta Boston ay dhaqangelinayaan, ka ma dambays marka la gaaro sanadka 2030, waxaan joojin doonaa isticmaalka shidaalka foosilla ee guryaha dadweynaha ee Magaalada laga dhiso. Tan waxay micnaheedu ay noqon doontaa in maalgelin lagu samaynayo dhismooyin aan horey loo arag oona ka soo baxaya himilooyinka hamiga Guddoomiye Healey ee bamka kulaylka hawlgelinta—hubinta in qoysaska baahiyaha ugu badan qaba, ay marka hore ka faa'iidaystaan Guryo badbaado qaba, iyo kharashyada tamarta oo hooseeya noqdaan.

Si wada jir ah, ayaa waxaan Boston u dhisi karnaa si ka cagaar badan shubka. Meesha guriyeynta la bixiyo, ee aan ahayn mid iska timaada, iyo dhaqdhaqaaqa ugu yar yahay, aanna marnaba ahayn mid mucjiso iska ah. Halka waxyaalaha aan anaga dhisno ay yihiin wax ku dhiirigeliya—laakin ma qeexno—anaga; oo waa halka jiil kasta ka iftiimaan kuwii ka dambeeyay.

***

Kaas oo i keenaysa jiilka soo socda. Aniga maayar ahaan, iyo hooyo ahaan, oo u dagaallamaysa mustaqbalka labadayda wiil—iyo carruurteena oo dhan—ayaa ah waxa u qalma waxa keenay degdegga ka dambeeya wax kasta oo aan samayno.

Sida aan u wajahno qorsheynta, habka Boston ee waxbarashada u wajahdo waxaa si qoto dheer u qaabeeyey taariikhdeena. Taariikhda/sheekadu waa mid ka sii badan oo dhammaanteen aan wada naqaano—oo oo waxay u qalantaa in la sheego—laakiin taas waxay noqon doonaa sanadka xiga ee Xaaladda Magaaladeena lagu soo qaadi doono. Caawa, waxaan rabaa in aan idinla wadaago dhawr ka mid ah waxyaabaha aan hadda samaynayno si aan u xoojino dugsiyadeena, oo aan u taageerno macalimiinteena, oo ardaydeena ku dalaala.

Waxaan ku bilaabayaa meelaha ay waxbarashadu ka dhacaan: waan wada ognahay waxa ay u eg tahay xarumo waxbarasho oo dad dareensiisa inay tahay iskuulaad heer caalami ah sida ay u eg tahay. Meel halkan aan ka fogayn, waxaa ku yaala xarunta cusub ee Akadeemiyada Boston Arts Academy—waa meel qurux badan, tamar hufan, oo daboolaysa baahiyaha iyo suurtogalnimada dhallinyaradeena. Laakiin ku ma socono si degdeg ah oo nagu filan. Dugsiga Sare ee Josiah Quincy ee Chinatown wuxuu noqon doonaa dugsi sare, oo cusub oo casri ah, laakiin mashruuca ayaa waxaa la bilaabay 2012: saddex Maayaro iyo lix muraaqib ka hor ayay ahayd. Ardayda fasalka 1-aad ahayd marka mashruucan la bilaabay ayaa hadda dhammayn doona dugsiga sare marka uu dhamaado.

Waxaan sameyneynaa isbeddello si aan u dedejinno dugsiyo qaar kaliya ma aha, ee laakiin dhammaan degmadeena oo dhan. Daraasada naqshadaynta dugsigeena waxay qaadan doontaa sanad buuxa nidaamka qorshaynta ee dugsi kasta oo ku yaal

Magaalada dhexdeeda, oo waxaan yeelan doonaa mashruucyo badan oo socda hal mar si ka badan sidii hore.

Dabcan, himilooyinka ardaydeena xarumaha iskuulka way dhaafsiin tahay. Aniga iyo Muraaqibka guud ku ma qanci doono wax ka yar heerka sare tacliimeed ee dhammaan dugsiyadeena, oo ay ardaydeena oo dhan heli karaan. Marka la eego doorarka hoggaamineed ee hoos imaanaya ee cusub ee diiradda lagu saaray tacliinta iyo sidii aan agabka hoos ugu dhigi lahayn heerka dugsiga, waxaan ku maalgelinaynaa shaqaalaha, horumarinta xirfadda, iyo manhajka—si loo helo aasaaska wax-akhris ee loo siman yahay kaas oo awood adag iyo ka-qaybgelin siinaya dhammaan maadooyinka oo dhan.

Waxaan raaci doonnaa heshiiska taariikhiga ah ee aan la galnay macallimiinta BPS si aan u wada naqshadeyno oo aan u beddelno sida aan ugu adeegno ardayda naafada ah annaga oo maalgelinaya lacag gaaraysa ilaa $50 milyan oo aan uga qaybgelinayo si arday kasta uu u helo waxbarashada uu u qalmo. Oo, maxaa yeelay waan ognahay in ardaydeenu ay yihiin xubnaha dadka iyo xubnaha qoyska markeedii hore, waxaan maalgelineynaa shaqaalaha bulshada iyo la-taliyayaasha oo aan ka hergelinayno dugsi kasta, inay yeeshaan shaqaale bulsho oo ku hadla laba luuqadood oo loo tabbabaray inay daboolaan baahiyaha ardaydeena iyo qoysaskeena ay qabaan.

Gugii hore, si ardaydeena aan ugu diyaarino fursadaha berrito, [waxaan ku dhawaaqnay fursad cusub oo kulliyada hore iyo dariiqyo hal-abuur ee shan dugsi sare laga hergelinayo dugsiyadaas oo ku yaal BPS] halkaas oo ay da'yarta ayy helayaan khibrad shaqo oo dhab ah iyagoona qaadanaya koorsooyinka heerka kulliyadda ee maadooyinka maaliyadda, daryeelka caafimaadka, iyo baayotek-ga. Caawa, waxaan ku dhawaaqayaa—inagoo la kaashanaya jaamacadda UMass Boston—waxaan ka hergelin doonaa aasaaskaas inaga oo tijaabineyno barnaamijka Sano (Year 13) oo laga bilaabayo Dugsiga Sare ee Fenway High School. Tan ayaa ardaydeena waxa ay siin doontaa sanad buuxa oo dheeraad ah oo koorsooyin heer jaamacadeed ay ku qaadan karaan iyagoon dayn lagu yeelan inta uga gudbayaan kulliyadda oo ay u dardargeliyaan shahaado.

Haddii dhallinyaradeenu aan ka filanayno inay noqdaan hoggaamiyeyaasha adduunkeenu ay u baahan yihiin, markaa dhammaanteen ayay xil naga saaran tahay

inaan qaadno tillaabo kasta si aan u hubinno inay helaan xirfado iyo khibrad ay uga soo bixi la'haayeen xilligan.

***

Dhowaan ayaa waxaan u dabaaldegnay samaynta Xafiiskeena cusub ee ka Qaybgalinta Dhalinyarada iyo Horumarinta (Office of Youth Engagement and Advancement)—waa sidaas, OYEA—iyada oo ay weheliyaan koox arday oo ka socota Dugsiga Blackstone School

oo iyagana dib ugu ma noqon. Waxay waydiiyeen qorshooyin ku saabsan barnaamijyada iskuulka ka dib la bixiyo iyo goorta dib loo furi doono barkadda. Oo waxaa jiray arday fasalka seddexaad dhigta oo xiran jaakad casuus ah oo midabka binkiga oo holof-holof ku ah ayaa rabay inuu oggaado: "*Como se siente ser alcaldesa?* Sidee bay ku dareensiinaysaa inaad noqoto maayar? Oo aniga waan garan waayay wax aan ugu jawaabo. "*Ocupada,*" ayaan ku iri. "Masquul." Taas oo run ah. Laakiin sidoo kale intaas way ka sii badan tahay.

Waxaa la dareemi karaa riyo oo kale iyo walaac, daal iyo awood—waxay ku dareensiinaysaa inay sida shaqada ugu muhiimsan ee adduunka. Laakiin waxaa intaa ka badan, waxay ku dareensiinaysaa sida hadiyad oo kale: Si aad u awoodo inaad maalin kasta kacdo oo aad shaqo u aado degmada oo aad jeceshahay dadka aad la shaqayso oo sidoo kale iyaguna ku jecel. Dad aan ka cabsanayn inay wax u qabtaan si ka duwan—oo raba inay ka soo baxaan xasaradaha soo foodsaara, oo raba inay gaaraan halka ugu hooseeya ee dhibaatada qotada-dheer si ay xididdada ugu siibaan caqabadaha hortaagan aragtideena waxa naga sareeya. Boston waa magaalo aan waligood joojin doonin inay gaarto—ilaa horumarka meesha ugu saraysa ee aan ognahay inay suurtogal tahay, iyo bulshada shaqadoodu ka dhigayso inay noqoto mid waarta.

Waad mahadsan tihiin, oo Ilaah ha barakeeyo Magaalada—iyo shacaba reer—Boostada.

###